

Waa la joojinayaan tillaaboooyinkii gobollada ee koroonaha dartiis loogu soo rogay Oslo iyo Viken

Dawladdu waxay go'aansatay in ay joojiso tillaaboooyinkii gobollada ee degmooyinka Oslo iyo Viken lagu soo rogay markii uu dillaacay fayraska nooca ingriiska. Go'aankan waxaa la gaaray ayada oo degmooyinka lala tashanayo.

- Xaaladda Oslo, Nordre Follo, Halden iyo degmooyinka ku xeeran ayaa hadda kala caddaatay taas oo keentay in ay dawladdu go'aan ku gaartay in la soo gabagabeeyo tillaaboooyinkii gobollada. Degmooyinku ayagaa hadda qiimaynaya tillaaboooyinka ay raacayaan ka sokow talooyinka iyo go'aammada dalka oo dhan khuseeya, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Agaasinka caafimaadka iyo Hay'adda caafimaadka dadweynaha ayaa la xiriiray degmooyinka ay arrintu khuseyso. Waxayna dawladda kula taliyeen in la joojiyo tillaaboooyinka dawladda, oo ay taas beddelkeeda degmooyinku degaankoodu ku soo rogi karaan tillaaboooyin ayagoo eegaya xaaladda kala qaadista cudurka ee hadba halkaas ka jirta.

Tillaaboooyinka gobolladu waxay soconayaan ilaa iyo 17-ka febraayo. Fredrikstad iyo Hvaler waxay codsadeen in ay tillaaboooyinku sii socdaan ilaa iyo 18-ka febraayo si ay u helaan wakhti ay uga fikiraan tillaaboooyin ayaga gaar u ah.

- Maalmaha soo socda ayay degmooyinku go'aan ka gaari doonaan tillaaboooyinka degaankooda ka jiri doona. Waxaa muhiim ah in ay dadweynuhu la socdaan natijjada arrintaas. Maxaa yeelay haddii la joojiyay tillaaboooyinkii dalka khasab ma aha in la fududeeyo tillaaboooyinka degmada aad deggan tahay, ayuu yiri Høie.

Warbixin intaas ka badan oo ku saabsan heerarka tillaaboooyinka

Dawladda ayaa go'aamin karta tillaaboooyinka laga hirgelinayo degmo iyo degmooyinka ku xeeran marka loo baahan yahay in tillaaboooyin si degdeg ah loo hirgeliyo laysuguna dubarido si looga hortago fididda cudurka.

Heerka tillaaboooyinka degmada lagu soo rogayo waxay ku xiran tahay hadba inta ay le'eg tahay khatarta cudurka dillaacay. Tillaaboooyin afar heer ah ayaa la kala dooran karaa.

[Halkan ayaad ka helaysaa muuqaalka tillaaboooyinka heerarka kala duwan.](#)